



Meeting Report

Kala guurka Soomaaliya: Doorkee u Bannaan Maamul Goboleydyada? (Maxaa dowr ah oo u bannaan maamul goboleedyada?)

Janaayo 2012

The views expressed in this document are the sole responsibility of the author(s) and do not necessarily reflect the view of Chatham House, its staff, associates or Council. Chatham House is independent and owes no allegiance to any government or to any political body. It does not take institutional positions on policy issues. This document is issued on the understanding that if any extract is used, the author(s)/ speaker(s) and Chatham House should be credited, preferably with the date of the publication or details of the event. Where this document refers to or reports statements made by speakers at an event every effort has been made to provide a fair representation of their views and opinions, but the ultimate responsibility for accuracy lies with this document's author(s). The published text of speeches and presentations may differ from delivery.

Bishii Luuliyo sanadka 2011, waxaa uu Chatham House qaban qaabiyeey kulan ay ka qeyb galeen mufakiriin Soomaali ah oo ka kala yimid Soomaaliya iyo qurbajoogta si ay falanqeeyaan halka loo guurayo ka dib dhammaadka muddada kala guurka ah ee dowladda ku meel gaarka ah oo dhammaanaysa bisha Agoosto sanadka 2012. Kulanku waxaa uu si gooni ah diiradda u saarey soo bixitaanka maamul goboleedyada kuwii hore iyo kuwa cusubba. Sidoo kale waxaa muuqata in xasilloonida Soomaaliya ay u dhaceysa si qeyb qeyb ah ayada oo ay soo badanayaan maamullada ka jira deegaanno ka mid ah Soomaaliya oo awood u yeelanaya in ay dadka u fidiyaan amni iyo maamul heer deegaaned ah. Wuxaa sidoo kale feer socda, in muhiimadda siyaasadeed ee beesha caalamku ay weli tahay in ay dib u dhisaan dowlad heer qaran ah.

Kulanku wuxuu lahaa saddex ujeeddo oo waaweyn:

- In uu faham ka sii wanaagsan ka helo maamul goboleedyada jira iyo kuwa soo baxayaba; waxa ay tiigsanayaan, awoodahooda iyo daldalooladoodaba; sida ay dadka Soomaaliyeed u arkaan iyo weliba sida ay beesha caalamku ula shaqeyn karto (haddiiba ay la shaqeyneyso).
- In laga wada hadlo sida ay maamul goboleedyadani u waafaqayaan ulajeeddada dheer ee helitaanka dowlad Soomaaliyeed, mushkiladaha iyo faa'iidooyinka ay u yeelan karaan wada shaqeyn uga timaada dibadda iyo xiriirka ay la leeyihii mashruuca federaalka – oo hadda 7 sano jirsadey.
- In laga hadllo in la caawiyo iyo sida Soomaaliya loo siin lahaa caawinaadda beesha caalamka ayada oo aan waxba u dhimeyn dadaalka deegaannada iyo helitaanka dowladda Soomaaliyeed ee heerka qaran Soomaaliya oo madax bannaan.

Gunaanadkan hoos ku qoran ayaa ka soo baxay falanqayntii oo waafaqsanayd Xeerka Chatham House ayada oo looga dan lahaa in si qotodheer loo fahmo qaar ka mid ah caqabadaha la xiriira soo gabagabowga muddada kala guurka ah ee Soomaaliya.

1. Hordhac

Did u helida xasilloonida Soomaaliya waa arrin muhiim u ah Soomaalida iyo inta la macaamisha balse horumarka laga gaarey dib u dhisidda dowlad qaran ayaa ah mid aad u gaabinaya lagana niyad jabsan yahay. Soo kordhidda maamul goboleedyada ayaa waxaa ay u muuqataa in ay soomaaliya siineyso baddal lagu gaari karo xasillooni iyo horumar. Dadaal sannado badan qaatey ka dib maamullada Somaliland iyo Puntland ayaa waxaa ay istaaajiyeen dhisme maamuleed waxaana ay dhiseen dowlado ilaa iyo xad howlkar ah, arrintaas oo looga guul darreystey in isla sidaa loo dhiso dowladdii dhexe. Maamul goboleedyo badan oo kale ayaa soo baxay oo isku dayaya in ay guushaas ku daydaan, balse in badan oo ka mid ah waxaa ay leeyihiin aasaas qabiil oo aad u xaddidan waxaana ku jira bulshooyin kooban.

Waxaa jira khataro xaaladdan la xiriira. Soomaali badan ayaa cabsi ka qaba in ay arrintani keeneyso Soomaalida oo u kala qoqobanta jabjab yaryar oo aan la maareyn karin dibna u dhigta dib u helida qarannimada Soomaaliyeed. Waxaa jirta mushkilad dhab ah oo ah kala qeybsanka Soomaalida u kala qeybsamayso qabaa'il iyo laf laf, mid waliba haysato malleeshiya in ay Soomaaliya dib ugu celin karto dagaalkii awalba burburiyey ee qabiil qabiilkha loogu dagaallamey 1990-maadkii. Qaab-dhismeed markaa si dadban u keena dagaal hor leh oo ka dhex dhaca maamullo badan oo iska soo horjeeda waxaa ay dib u dhigeysa rajo kasta oo laga leeyahay dib u dhisidda dowladda dhexe ee qaranka, waxaana ay ka dhigeysa xasilloonida qallafsan oo ay keeneen Al-Shabaab mid ay dadku jecleystaan.

Axdiga Qarameedka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya ayaa waxaa uu siinayaas Soomaalida qaab la isugu hayn karo wada jirka dalka isla markaana siinaya fursad ay ku soo dhismaan maamul goboleedyadu. Balse dowladda ku meel gaarka ah ayaa ku fashilantey muddadii todobada sano ee la soo dhaafey in ay wax natijjo horumar leh ka gaarto gaaritaanka himiladaas. Kulanku waxaa uu ka doodey sababaha keeney fashilkan wuxuuna is weydiiyay bal in ay muhiim tahay in qaab cusub loo wajaho mustaqbalka Soomaaliya.

Jawaabta qayb ahaan waxaa laga helayaa farqiga u dhexeeyaa ballanta lagu ballamey in federaalnimo iyo ismaamul la gaaro sida ku xusan Axdiga ku meel gaarka ah iyo xaqiqada ka jirta dowladda ku meel gaarka ah iyo howsha deeq bixiyayaasha oo guud ahaanba ku sii jeedda (guulna aan ka gaarin) dib u dhisidda maamullada dowladda dhexe. Maamul goboleedyada federaalka noqon kara waxaa ay ku soo baxeen dadaal iskood uga yimid oo ku dhisan dib u heshiisiin iyo nabadeyn ka dhacdey deegaankooda oo ku saleysan dhaqanka Soomaaliyeed. Arrintani waxaa ay dhacdey ayada oo ka

baxsan dastuur sameynta dowladda dhexe ee u socota sida rasmiga ah amaba sida aan rasmiga aheyn waxeyna keentey in xiriirka ka dhexeeeya iyaga iyo dowladda dhexe uu noqdo mid aan sahaneyn. Maamul goboleedyadan oo sameystey xiriirro caalami ahna waxaaba ay keentey mushkilad kale.

Xagga siyaasadda Beesha caalamka waxaa hor yaalla laba daran kala dooro. Maqnaanshaha dheeraadey ee dowladda Soomaaliyeed waxaa ay culeys ku keentey dowladaha deriska ah waxaana ay dhalisey nabadjelyo darro khatar ah oo ka jirta gobolka. Xaaladda Soomaaliyeed lafteeda waxaa ay keentey khataro badan oo caalami ah, oo ay ka mid yihiin, howlaha argaggixiso, burcad badeed iyo tahlil dadka oo aan xaddidney. Beesha caalamka waxaa ay dooneysaa in xasiloonda Soomaaliya ay caawiso balse ma garaneyso sidey ku caawin laheyd. Ma waxey sii waddaa taageeridda dowladda ku meel gaarka ah ayada oo rajeynaya in ugu danbeyntii ay soo baxdo dowlad dadka Soomaaliyeed u cuntanta? Mase waxaa ay diiradda saartaa maamul goboleedyada caddeyn kara in xasiloonda iyo maamulkaba uu ku waarayo taageerada dadka? In la isku dayo in labadaba arrimoodba la wada sameeyo sida loo yaqaan – the dual track policy – miyey ka soo horjeeddaa amaba wax u dhimeysaa ulajeeddada fog ee in dib loo dhiso xasiloonda iyo dowladda Soomaaliyeed?

Warbixintani waxaa ay soo bandhigeysa sawirka guud ee noocyada maamuleed amaba xukuumadeed ee ka jira Soomaaliya. Waxaa ay qiiimeyneysaa mushkiladaha ka imaan kara amaba fursadaha ay leedahay badashada ayaamahan ay soo badanayaan maamul goboleedyada, waxaana uu ku soo gabagabeyn doonaa geedi-socodyada ay Soomaalida hogaamiyan iyo dowladda beesha caalamka.

2. Noocyada Xukuumadaha

Inkasta oo Soomaaliya lagu tilmaamo in ay tahay dhul aan la xukumin, xaqiqadu arrintaas aad ayey uga fog tahay. Waxaa jira dabaqado badan oo xukuumadeed, oo aad ugu kala duwan hufnaanta iyo awoddha ay u leeyihiin in ay adeeg fidiyaan, qaar ayaa la aqoonsan yahay qaarna ma dhaafsiisna mala awaal. Ayada oo ay weli socoto shaqada dastuur sameynta marka laga eego aragtida dowladda ku meel gaarka ah iyo heerka qaran waxaa ay dhamaantood ku shaqeynayaan jahawareer dastuureed iyo mid sharchiyeedba.

Laga bilaabo tan iyo markii ay dowladda Mareykanku sanadku markuu ahaa 2010 ku dhawaqdey siyaasaddeeda ah in ay wax la qabaneyso dowladda

dhexe iyo maamul goboleedyadaba loona yaqaan istraatijiyyada ‘dual-track’, caddad badan oo ah maamul goboleedyo iyagu is magacaabey, qaarkood aanay ka badneyn magac boorso lagu sito, ayaa soo baxay.¹ Faragelinta dibadda waxaa ay mar walba ku laheyd Soomaaliya saameyn baaxad leh sidaa darteed ayaa dadka ka faalloodaa Soomaaliya ay qaarkood arkaan in farabadashada maamul goboleedyada cusub ay tahay u xusul-duubkii ugu danbeeyey si ay qeyb uga noqdaan geeddi-socod siyaasadeed oo haddana dibadda laga soo abaabulayo. Dabcan waxaa jira farqi u dhexeeya maamul goboleedyadan cusub qaar ka mid ahna waxaa ay leeyihiin awood ay ku maamulaan deegaan ayna ku fidiyaan adeegyo halkaasna ay ka shabbahaan xukuumadaha Somaliland iyo Puntland. Isla markaasna beesha caalamku ma rajeyn karto in ay maamul goboleedyo ay ku xoogsamaan taageeradeeda oo qura ilaa ay ka sameysmeysa howsha deegaanka ee ka qeybgalka siyaasadeed ee dadka deegaankaas.

Xukuumadaha ka jira Soomaaliya waxaa loo qeybin karaa dhowr qeybood:

(1) *Xukuumadaha heerka qaranka*

Dowladda ku Meel gaarka ah (TFG) oo uu hogaminayo Sheekh Shariif Sheekh Axmed waxaa ay buuxisaa kursiga dowladda sharciga ah ee dunida u aqoonsan tahay Soomaaliya. Waajibaadkeeda waxaa lagu dhisey Axdigaa ku meel gaarka ah oo lagu heshiiyey xilligii Shirkii Qaran ee Nabadda ee sanadkii 2004. Dowladda Ku meel gaarka ah waxaa ay sheeganeysaan in ay xukunto dhammaan dhulka Soomaaliyeed ayada oo ay waliba si diblomaasiyeed ay arintaa ugu taageerayaan Qaramada Midoobey iyo beesha caalamkuba.

Dowladda ku meel gaarka ah marnaba awood uma yeelan in ay si dowlad ahaan ah uga taliso dhul baaxad weyn lagu tilmaami karo oo Soomaaliya ka mid ah. Waxaa ay ku tiirsaneyd taageero military iyo ilaalin ay siinayaan Midowga Afrika. Iyo taageero dhaqaale iyo mid siyaasadeed oo ay siiyaan Qaramada Midoobey, Midowga Yurub, Midowga Afrika, Mareykanka iyo kuwo kaleba.

Si kasta oo dhawaan ay militari ahaan ugu guuleysatey Muqdisho, dowladda ku meel gaarka ah waxaa keliya oo ay xukuntaa qeyb kooban oo ka mid ah

¹ Istraatijiyyadda lagu magacaabo dual-track waxaa ay tilmaantey rabitaanka dowladda Mareykanka in ay la shaqeysa taagerana siiso maamul goboleedyada isla markaana ay sii wado taageerada dowladda ku meel gaarka ah.

caasimadda. Maamullada taageersan ayaa dhul aad uga badan xukuma, balse xiriirka ka dhexeeya dowladda ku meel gaarka ah iyo maamullada taageera ayaa ah mid aad u adag. Dowladda ku meel gaarka ah waxaa dhibaato ku haya kala qeybsanaan aad u badan. Bishii Juun ee sanadkii 2011 waxaa loo baahdey faragelina xukuumada Ugaandha in ay dhaliso heshiis la dhex dhigo Gudoomiyaha baarlamaanka ku meel gaarka ah, Shariif Xasan iyo Madaxweynaha Sheekh Shariif. Waxaa dowladda soo marey saddex Ra'iisul Wasaare tan iyo sanadkii 2009.

Xukuumadda **Somaliland** waxaa ay lafteeedu isu soo bandhigtaa in ay tahay dowlad heer qaran, oo ka go'day dalka intiisa kale. Waxaa ay u haysataa in xiriirka rasmiga ah ee kala dhexeeyey Soomaaliya inteeda kale uu kala go'ay sannadkii 1991 iyo weliba in madax banaanideeda lagu ansixiyey afti dadweyne oo la qabtey sanadkii 2001. Balse madax bannaanida Somaliland dunidu ma aqoonsana, si kasta oo ay u tahay maamulka Soomaaliya ka mid ah oo fidiya adeegga ugu hufan ahna kan ugu dimuqraaddisan. Somaliland waxaa ay isu haysataa in wadahadallada Soomaaliya aysan khuseyn mana ka qeyb gasho wada hadallada ku saabsan mustaqbalka Soomaaliya. Haddii nabadgelyo la isku halleyn karo ay ka soo baxdo Soomaaliya inteeda kale waxaa markaa degdeg noqoneysa su'aasha ku saabsan xiriirka ay Somaliland la yeelmaneyso.

Himilada xoogagga **Al-Shabaab** waa heer qaran Waqtiga xaadirka ah waxaa ay xukumaan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya badankood waxaana ay ka soo horjeedaan jiritaanka dowladda ku meel gaarka ah iyo xukuumadaha badan ee maamul goboleedyada. Inkasta oo ay Al-Shabaab lumiyeen dhul iyo sumcad siyaasadeed iyo mid mooral mudadii ay dhacdey macaluushu, waxaa ay weli yihii xoogagga militari ee ugu abaabulka wanaagsan ee ka jira koonfurta Soomaaliya. Al-Shabaab wax guul militari ah kama aysan gaarin Puntland iyo Somaliland, balse waxaa ay labada meeloodba ka fuliyeen howlo argaggixiso waxaana la aamminsan yahay in ay taageerayaal ku leeyihii labadaba.

(2) *Dowlad goboleedyada*

Qeybta labaad waa **dowlad goboleedyada** ayaga oo si buuxda u waafqaqaya mabaaddii'da Axdigaa ku meel gaarka ah xukumana dhul cayiman. **Puntland** waa tusaalahu ugu horumarsan maamullada kale ee cusubna waxaa ay isku

dayayaan in ay ku daydaan. Puntland waxaa ay si baahsan u xukuntaa dhul ka kooban gobollo badan² iyo qabaa'illo kala duduwan. Waxaa ay leedahay awood ay ku fuliso howlaha dowladda sida ku dhaqanka sharciga, ururinta canshuraha, iyo matalaadda dadka Puntland. Puntland waxaa ay ku dheggan tahay in ay noqoto dowlad federal ah oo ku jirta Soomaaliya oo mideysan waxaana ay si buuxda uga qeyb gashaa wada hadallada lagu soo afjarayo muddada kala guurka.

Maaddaama ay weli tahay mid aan la aqoonsan, dad ayaa ku doodaya in **Somaliland** ay iyaduna u shaqeysa si dowlad goboleed maadaama ay Puntland kala mid tahay awoodaha dowladeed. Balse xukuumadda Somaliland fikir kaa ka duwan ayay ka qabtaa mustaqbalka Somaliland.

(3) Maamullada gobollada iyo degmooyinka

Heer ka hooseeya ayaa waxaa ka jira **maamullada deegmooyinka** oo xukuma in ka yar laba gobol balse ilaa iyo heer xukuma deegaankaas ay jogaan. **Galmudug** ayaa ah midka loogu aqoon badan yahay qeybtan, waxaana lagu casuumey in ay ka qeyb gasho wadahadallada iyo heshiisyada ku saabsan kala guurka.

Ahlu Sunna Wal Jamaaca (ASWJ) waa isutag siyaasadeed oo ku dhisan ku dhaqanka diinta Islaamka oo soo jireenka ahay mana isu aragto in ay tahay maamul gobol amaba degmo. Hase yeeshii taageeradeedu waxaa ay ku dhisan tahay qabiil iyo xukun deegaan waxaana ay markaa u eg tahay maamullada kale ee degmooyinka. ASWJ waxaa ay u ahayd dowladda ku meel gaarka ah taageere muhiim u ah la dagaallanka Al-Shabaab balse xiriirkoodu wuxuu ahay mid marar badan carqalado galayey. ASWJ sidoo kale ayaa waxaa ay qeyb ka tahay wadahadallada ku saabsan kala guurka.

Ximan iyo Xeeb waxaa ay ku billaabatey in ay isu abaabusho maamul degmo waxaana ay xukuntaa deegaan, balse weli kama aysan qeyb-galin wadahadallada sare sida ay uga qeyb galeen Galmudug iyo ASWJ.

(4) Maamullada soo baxaya

Maamulada (ee mala awaal ah ee) soo baxaya ayaa ayaamahan isha soo jiidanaya. Waddamada deriska ah ayaa qaarkood taageeraya, sida Azania /

² Cahdigaa ku meel gaarka ah waxaa uu u baahan yahay in ay dowlad goboleedka ka kooban tahay "laba gobol iyo wixii ka badan oo isu taga oo ku dhisan rabitaankooda" Qeybta 11, 2 b. (Goboladu waa kuwii ka horeeyey goboladii jirey ka hor 1991.)

Jubbaland, balse awoodda ay u leeyihiin in ay yeeshaan aqoonsiga sharchiyadda deegaanka iyada oo ka baxsan awooddooda militari waa mid aan welii caddeyn. Qaar ka mid ah dadka Soomaaliya u fiirsada ayaa u arka in ay yihiin wax ay ajnabi dhoodhoobeen aanna aheyn qaab lagu doonayo in maamullo deegaan lagu dhiso. (faragelinta militeri ee dowladda Kenya ee bishii Oktoobar ee sanadka 2011 dhaceyna kulanka ka dib ayaa aad u xoojineysa fikirkan) Dowladda Itoobiya ayaa taageero siisey maamullo hore uga dhismey Koonfurta Galbeed ee Soomaaliya waxaana xeeldheerayaasha qaarkood aamminsan yihiin in ay dib u dhisi doonto haddii xukunka Al-Shabaab ee gobolladaas laga qaado amaba la wiiqo.

Marka laga soo tago maamullada ay riixayaan awoodaha gobolku, waxaa jira maamullo kala duwan oo tiigsanaya oo aan badanaaba ka badneyn koox ku saleysan baraha internetka amaba kooxo lagu sameeyey qurbaha oo cadaadis siyaasadeed uun darteed loo sameeyey. Kuwan waa kuwa ugu dhibka badan in qiimeyn lagu sameeyo. Ka qeybgalayaasha shirka ayaa sheegey in wax yar laga og yahay sida ay bulshooyinka Soomaaliyeed oo ay sheeganayaan in ay mataalaan oo ay maamulaan ka dareensan yihiin. Mararka qaarkood maamulladan ayaan laf ahaantoodu garaneey waxa ay doonayaan in ay noqdaan, iyo sida ay u waafaqayaan sawirka guud ee dowladnimada. Inta aysan qaadan mabda'a la shaqeynta, beesha caalamka waa in ay sameeyaan qiimeyn cad oo ay weydiyaan: waxa ay tahay malaha ay bulshadu ka qabaan aqoonsiga sharchiyadda maamulladan iyo waxa ay maamullada laftoodu ay doonayaan: ma waxey donayaan in ay noqdaan maamullo siyaasadeed, mise adeeg fidiyayaal, mise in ayba nabadjelyada keligood gacanta ku hayaan.

3. Qaab-dhismeedyada

Tan iyo sanadkii 2004, Somaaliya waxaa magac ahaan u maamulayay dowladda ku meel gaarka ah, oo markii ugu horeysey uu hogaaminayey Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf Axmed, ilaa iyo 2009-kiina Madaxweyne Shiikh Shariif. Muddadan oo dhan dowladda ku meel gaarka ah waxaa ay ku fashilantey in ay si siyaasadeed amaba si awood militari oo hufan isugu dhisaan gudaha dalka Soomaaliya. Madaxweyne Yuusuf waxaa magaalada Muqdisho geeyey ciidammo Itoobiyaan ah sandadkii 2006 halka uu Madaxweyne Shariif uu ku joogo Al-Shabaabna uga badbaadayo 10,000 oo ciidammo nabad-ilaaliyaal Afrika ka yimid ah.

Qaab-dhismeedka dastuur ee dowladda ku meel gaarka ah waa Axdiga ku meel gaarka ah, kaas oo la dhaqan geliyey bishii Feberaayo sandkii 2004

iyada oo la joogo magaalada Nairobi. Axdigu ugu horeyntii wuxuu waajibaad siiyey muddo shan sanadoo ah, oo ku eg sannadka 2009. Mudadan gudaheeda waxaa laga doonayey dowladda ku meel gaarka ah in ay ku baaqdo dib u heshiisiin ayna sameyo dastuur cusub ka dibna hoostiisa lagu fuliyo doorashooyin dowlad dimuquraadiyad ahna lagu dhiso. Kordhintii ugu horeysey ee 2-da sano aheyd waxaa lagu heshiiyey sanadkii 2009 markaas oo uu madaxweyne Sheekh Shariif uu beddely Cabdullaahi Yuusuf. Balse howlihii dastuuriga ahaa ee ku qornaa Axdiga ku meel gaarka ah lama dhameystirin markii la gaarey dhamaadka muddada toddobada sano ah ee kala guurka ah xaaladda siyaasadeed iyo midda militari-na waxaa ay ku sugaran yihiin rajo yari laga qabo in ay xal buuxa keento inta aysan dhammaan muddada kala guurku .

Heshiis dhexdhedaadin ah ayaa waxaa soo dhameeyey xukuumada Ugaandha, ayada oo waqtii ku dareysa muddada Madaxweynaha, Gudoomiyaha ilaa iyo bisha Ogoosto 2012, muddadaas oo lagu heshiiyey in dastuurka la dhameystiro doorashooyinna lagu galoo. Heshiiskan ka dib, waxaa la saxiixey geeddi-socod siyaasadeed 6-dii bishii Sebtembar 2011 waxaana wada saxiixey dowladda ku meelgaarka ah, Puntland, Galmudug iyo ASWJ oo dhammaan ku heshiiyey in ay ka shaqeeyaan sidii lagu dhisi lahaa dowlad cusub iyo dastuur joogta ah marka la gaaro bisha Ogoosto sanadka 2012.

Qaabka dowladeed ee mustaqbalka Soomaaliya waxaa lagu tilmaamey Axdiga, kaas oo oranaya: '*Dowladda ku meelgaarka ah ee Jamhuriyadda Soomaaliyeed waxaa ay ahaan doontaa nidaam ismaamul baahsan oo ku dhisan qaabka federaalka.*' (Qeybta 11.1). Guddi federaal ah oo madax bannaan waxaa ay aheyd in lagu soo magacaabo muddo sagaashan maalmoood ah marka laga billaabo marka dowladda ku meel gaarka ah la dhaariyo, guddigaas oo laga doonayo in uu sameeyo nidaam federaal ah. Sida waafaqsan jadwalkii ugu horreeyey, '*Dowladda ku meelgaarka ah waa in ay sugtaa in howsha Soomaaliya looga dhigayo federaal ay ku soo gabagabowdaa muddo laba sano iyo bar ah laga billaabo maalinta la sameeyo guddiga*' (Qeybta 11.8). Sidoo kale qeybta labaad ee qorshaha geeddi-socodka, waa inay saxiixayaashu ka kulmaan arrimaha federaalka si ay qeyb uga noqoto dastuurka cusub.

Dhab ahaantii, dowladda ku meel gaarka ah wax badan kama aysan qaban qaab u sameynta federaalka Soomaaliya waxbana kama aysan qaban in ay dhiirri geliso sameysanka maamullo federaal ah. Dadaallada lagu dhisey maamullada gobolada iyo deegaannada waxaa ay dhaceen ayada oo aysan wax taageero amaba dhiirri-gelin ah ka helin Muqdisho amaba beesha

caalamka. Puntland, oo ah dowlad gobleedka ugu hormarsan oo haddana aamminsan aragtida midnimada Soomaaliya, waxaa la sameeyey 1998 ka hor inta aan Axdiiga ku meel gaarka ah la sameyn. Somaliland iyaduna waaba sii jirtey, balse waxaa ay ku shaqeyneysey qaab-dhismeed ka baxsan midnimada Soomaaliya. Maamullo kale oo dhowaan soo baxay ayaa jira ayaga oo ku yimid waaqicyo aad u kala duwan. Galmudug waxaa lagu dhisey taageerada Puntland. Itoobiya ayaa taageertey soo bixitaanka ASWJ (si ay uga hortagaan Al-Shabaab) dowladda Kenya-na waxay taageertaa Azania.

Dadaallada dowladda ku meel gaarka ah waxaa ay diiradda saareen dhisidda awoodda dhexe. Sidoo kale waxaa aad u mashquulihey kala qeybsanaan xagga awoodda ah iyo maamulka dhaqaalahay ay ka keentey dibadaha. Inkasta oo ulajeeddadu ay aheyd in Soomaaliya federaal laga dhigo, dadaallada gudaha iyo dibadaba waxaa ay diiradda saareen sidii loo dhisi lahaa oo keliya hay'adaha dowladda dhexe.

4. Khataraha (Mushkiladaha) ka iman kara maamul goboleedyada

Badanka Soomaalida ka soo horjeedda maamul goboleedyada waxaa ay aragtidoodu ku dhisan tahay shakiga ay ka qabaan maamul goboleedyadu in ay yihiin waddooyin lagu gaarayo dano qabiil balse aysan aheyn maamullo bulshada u adeegaya sida ay sheeganayaan. Soomaali badan ayaa qaba in dhisidda maamullo badan oo cusub haddana iska soo wada horjeeda ay keeneyso in aqoonsiga Soomaaliyeed uu baabba'o isuna bedelo qabyaalad. Waxaa ay ku eedeynayaan in qabyaaladdu mas'uul ka tahay badanka dagaalka Soomaaliya ku habsadey labaatankii sanadood ee la soo dhaafey waxaa kale oo ay u arkaan in ay tahay caqabadda ugu weyn ee weli loo dhisi la'yahay dowlad qaran oo waarta. Sidaa darteed waxaa ay u muuqataa in ay tahay qaab-dhismeed aan u qalmin in dalka dib loogu dhiso. Ka soo horjeedayashu waxaa ay ku doodayaan in waddan lagu dhisey maamul qabiil uusan marnaba noqon karin mid xasilloon, sababtoo ah deegaannada qabaa'ilku waa is dul-fuushan yihiin, waxaana cirka isku shareeraya tartanka siyaasadaha qabaa'ilka iyaga oo hor istaagaya horumarka qaranka waxaana ay markaa keeneysa siyaasado khatar ah oo aan wada shaqeyneyn.

Somaliland iyo Puntland waa, ilaa iyo xad, maamullo ku dhisan qabiil, waxaana ay haystaan qabaa'il waaweyn. Balse waxaa ay labaduba ku guuleysteen in maareyn siyaasadadeed oo aan fududeyn ay hirgeliyaan oo ka qeyb gelisey qabaa'ilka iyo lafaha kala dudduwan oo deegaankooda ka tirsan ayna weliba sameeyeen isu tanaasul siyaasadeed si looga wada qeybgalo. Arrintaa markey hirgeliyeen ayaa waxaa ay haddana ku

guuleysteen in ay sameeyaan aragti ka shisheysa maslaxad qabiil oo kooban. Maamullada cusub ayagu qabiil ahaan ma kala dudduwana. Galmudug iyo Ximan iyo Xeeb waxay mid walba matashaa hal laf oo ka mid ah hal qabiil, sido kale kuwa tiigsanaya in ay maamullo dhisaanna waxaa ka muuqda in ay wadaan dan qabiil kamana muuqato iskaashi dhab ah oo gobol ku saleysan. Al-Shabaab waxaa ay ku celcelisaa, ugu yaraan hadalkeeda siyaasadeed, in ay ka soo horjeeddo qabyaaladda farriintanna waxaa ay weli macno u sameyneysaa wadaniyiinta Soomaaliyeed.

Tusaalahaa kooxda cadaadiska siyaasadeed ee Sool, Sannag iyo Cayn (SSC) ayaa la soo qaadey si loo muujiyo in mowjadda cusub ee maamul goboleedyadu ay keeni karto kala qeybsanaan hor leh. – arrintan oo ah maamul cusub oo ka go'aya Somaliland. SSC waxaa ay ka soo horjeedaa gooni isu taagga Somaliland waxeyna dooneysaa in ay maamul goboleed ka sameyso bariga Somaliland, dhul ay isku hayaan Somaliland iyo Puntland. SSC waxaa ay hadda dooneysaa maamulkeeda oo ku hoos jira Soomaaliya oo mideysan si ay u matesho danaha laf-teeda qabiil. Arintanina waa dhaqan socda oo keeni kara in qabiil kasta amaba dan kasta oo mar wax ka dida in ay sameystaan maamulkooda u gaarka ah intey nidaamyada la isla dejistey wax ku xallisan lahayeen dantoodana ku gaari lahaayeen.

Mushkiladda maamullada cusub ee soo baxaya waxaa loo haystaa in qaar badan oo ka mid ah ay yihiin wax awoodaha ajnabiga ay sameysteen amaba ay gacanta ku hayaan gacmo dibadeed. Azania / Jubbaland iyo ASWJ waxaa ay ku tiirsan yihiin taageerada Kenya iyo Itoobiya. Arrintani waxaa ay keeneysaa su'aal ku saabsan xaqiiqada sheegashadooda oo ah in ay matalaan danaha bulshada waxaana ay shaki weyn gelineysaa aqoonsiga sharciyaddooda. (mushkilad middaas la mid ah ayaa waxaa ay haysataa dowladda ku meel gaarka ah, ayada oo lagu eedeynayo in ay ku shaqeyso dano shisheeye aysanna ku shaqeyn danta qaranka Soomaaliyeed.)

Taariikhdiin aan guusha laga gaarin ee faragelinta shisheeye ay farageliyaan siyaasada Soomaaliya ayaa waxaa ay soo saareysaa mushkilad kale oo toos ula xiriirta, ayaga oo rajeynaya in ay helaan caawinaad dibadda ka timaada, ayaa maamullada soo baxaya waxaa ay isu dhisayaan qaabka ay u maleynayaan in ay beesha caalamku ay dooneyso, intey ka fikri lahaayeen waxa ay bulshadoodu donayso. Qaabkan "isku dayashada ah" waxaa uu hoos u dhigeyaa lagana yaabaa in uu dhaawac u geysto guulaha ay gaareen maamul gobleedyada sida xooggan u dhisan. Waxaa ay weyn karaan waxaayalaha guusha u soo hooyey oo ay ugu horreysa in ay bulshadu maamulka iyadu leedahay.

Muddada fog marka laga eego, ku fogaanshaha faragelinta siyaasada Soomaaliyeed ma keeni karto xasilooni. Labaatankii sanadood ee la soo dhaafey faragelinta noocan ah waxaa ay keentey in ay hor istaagto xalka ka iman lahaa bulshada lafteeeda. Waxaa jira shaki aad u weynaanaya oo oranaya in danaha derisyada maanta xooga leh ay ku jirto Soomaaliya oo la kala qeybiyey iyo in kala qoqobka ka imanaya maamulladan cusub ee soo baxaya ay arintaas u adeegeyso. Sidaa daraadeed maamullada cusub oo looga soo fikirey laguna dhisey taageerada shisheeye ay la kulmi doonto mushkiladaha ogoalaanshaha shariyed ee haysta dowladda ku meel gaarka ah.

Arinta ogalaanshaha shariyadda ayaa weli ah caqabada aasaasiga ah ee hor taalla dowladda qaranka iyo maamul goboleedyada. Maamullada iyagu haysta oggolaansho shariyed ee deegaanka ayaa leh fursad ay ku guuleystaan, balse su'aasha dhabta ah waxaa ay ka taagan tahay dhaqan galka danaha qabiil oo noqda aasaaska uu maamul ku dhismayo. Walaaca dhabta ah oo ah in maamulka siyaasadeed ee Soomaaliya uu aad u kala burburo, oo markaa keenta xaalad degganaansho la'aan joogta ah, arrintaasi waxaa ay istaahishaa in si dhab ah loogu xisaabtamo. Hay'ado iyo qaab-dhismeedyo qarameed ayaa loo baahanayaa si loo hubiyo in waxyaalahu ku soo kordhaya deegaanada aysan noqon waxyaalo mustaqbalka keena dhibaatooyin.

5. Wanaagga uu leeyahay qaabka ismaamulka baahsan

Walaaca aan soo sheegney qaar ka mid ah waxaa lagu xalliyey tusaalooyinka Somaliland iyo Puntland. Dadka deegaannadaas ayaa waxaa ay soo dhisayeen sannado badan maamullo xasilloon oo shaqeynaya. Maamulladaan iyo weliba baahida loo qabo in lagu deydo ayaa waxaa ay caddeyn u tahay qanaca ay Soomaalidu ku qanacsan tahay in la dhiso maamullo iyo xukuumado ka soo askuma hoos korna u baxa. Qaab-dhismeedyadan waxaa ay u baahan yihiin ka qeybgal bulshada ah oo baahsan ayada oo la adeegsanayo duqeyda, hogaamiyayaasha ganacsiga, culimada diinta, iyo kuwo kale ayada oo weliba lagu darayo in si qotodheer loogala hadlo bulsha weynta. Wada tashiga iyo wada hadalka noocan oo kale ah kama uusan dhicin heerka qaranka waxaana dhici karta in uusanba suurtagal aheyn.

Waxaa ka maqan dowladda ku meel gaarka ah waa oggolaansho shariyadeed oo caan ah. Dad badan waxaa ay arintani sabab uga dhigayaan qaabka lagu dhisey dowladda ku meel gaarka ah, iyada oo

dibadda lagu soo naqshadeeyey gacan badanna ay ka geysteen shisheeyuhu. Iyada oo ay ku socoto taageero militari oo ka timid Midowga Afrika iyo taageero dhaqaale oo ka timaada kuwo badan oo beesha caalamka ka mid ah, dowladda ku meel gaarka ah uma aysan baahan in ay dadka Soomaaliyeed isaga gaddo adeeg ay u fidiso iyo natijjo kale oo dadku ku qiimeyeen lahaayeen. Arintanina waa midda ay kaga duwan yihiin xukuumadaha Puntland iyo Somaliland, oo ku tiirsan inta badan canshuur ay ka qaadaan deegaankooda, balse dowladda ku meel gaarka ah waxaa si joogta ah ugu soo qulqula dhaqaale ayada oo aan loo aabba yeelin howlqabadkeeda.

Dowladaha ka jira Somaliland iyo Puntland waxaa ay ku soo baxeen qaab deegaanka ku saleysan waana in ay si joogta ah oggolaanshahooda sharchiyeed u cusbooneysiyaan. Wawaana ay ku sameeyaan si doorashooyin dimuquraaddi ah sida Somaliland oo kale, amaba si wada xaajood gorgortan hoggaamineed ah sida Puntland oo kale, balse qaab noocaas oo kale dadka looga hanto ogalaansho sharchiyeed kama jirto Muqdisho. Beesha caalamku waxaa ay aad ugu sii jeeddey dib u dhisidda dowladda dhexe oo xooggan ee Soomaaliya iyada oo aan wax natijjo wanaagsan ahna aan weli laga gaarin; halka waqooyiga Soomaaliya maamulladan oo lagu dhisey sharchiyad deegaan ay horumar ku tallaabsanayeen. Horumarkaasna wuxuu ahaa mid si tartiib-tartiib ku socda mana aheyn mar walba mid si dhib la'aan ah ku socda, balse mar walba waxaa ay ka jawaabayeen cadaadisyada dadka deegaanka ka yimaada, waxaana la soo wadey in mudo ah waxaana ay caddeeyeen in dimuquraadiyad ka soo billaabata deegaanku ay tahay aasaas macno leh oo dowlad lagu dhisi karo.

Kuwa tageersan qaabka dowlad goboleedyada waxaa ay tilmaameen in dowladdii hore ee Soomaaliya (ilaa iyo 1991) dhammaan dhaqaalihii waddanka iyo horumarintaba ay ku koobnaayeen magaala madaxda, wax adeeg dowladeed ahna lama geynin gobollada. Arintan ayaa aheyd daciihnimo ku jirtey nidaamka dowladda Soomaaliyeed, markey Muqdisho burburteyna dowladda oo dhan ayaa markaa burburtey. Qaabkan cusub ayaa in muddo badan ah muujiyey fursadaha ku jira oo ay xagga siyaasadda iyo midka horumarka dhaqaaleba u keenaya gobollada ayada oo ku dhisan siyaasad is afgrad ah. Qaabkan ayaa leh awoodda uu ku saxo khaladaadkii hore loo galey, waxaana uu soo bandhigayaa muddada fog qaab lagu xoojin karo oo aan daciifineyn dowladda Soomaaliyeed ee mustaqbalka.

Soo bixitaanka maamulada cusub oo ka kooban qabaa'il kooban amaba hal laf oo ka mid ah hal qabiil ayaa laga wadahadley. Kuwa iyaga taageersan ayaa soo jeediyeen inkastoo ay yihiin maamullo kooban hadana waxaa ay

matalaan tiigsi dhab ah oo dadkooda ka timid si ay arrimahooda u maareeyaan. Qaabka kor ka soo dhiska dowladeed waa uu fashilmey waxeyna doorteen in ay is-maamulaan ilaa iyo inta laga gaarayo waqtiga dowlad heer qaran ah la sameynayo. Dadku waxey garowsadeen in aysan wax ka sugi karin dowladda ku meel gaarka ah waana in ay iyagu isku caawiyaan in ay suaan ammaankooda adeegyada aasaasiga ahna ku fillaadaan. Qaab-dhismeedka Putland iyo Somaliland ayaa u sameeyey meel ay ku dayan karaan. Maamullada soo baxaya waa in aan lagu eedeyn in ay yihiin wax shisheeye u shaqeeya – taageeradooda badankeed waxaa uu ka timaadaa bulshadooda qurba joogta ah waxeyna isu arkaan in ay gacan ka geysanayaan dib u dhiska mustaqbalka Soomaaliyeed ee aysan wax burburineyn.

Waxaa jirey dood ku saabsaneyd in la heli karo iyo sida loo heli karo maamulladan cusub oo la waafajinayo ku shaqeynta Axdiga oo kala saaraya heerarka maamul ee dowlad goboleed, maamullada gobollada iyo degmooyinka. Waxaa la soo jeediye in maamulladda yar yar ay isku biiri karaan si ay u noqdaan dowlad goboleed, ayadoo markaas noqon karta wadadii loo mari lahaa dib u dhiska dowladda qaranka. Balse, haddaanan la helin qaab la isu waafajin karo oo heer qaran ah in ay dhici karto mushkilad dhab ah oo kala googgo' ah oo ay horseedaan maamulladan yaryar.

Waxaa kale oo laga doodey in gobolladda waqtigan xaadirka ah ku jira gacanta Al-Shabaab ay awood u yeelan karaan in ay isu abaabulaan dowlad goboleed ka mid ah mashruuc qaran. Inkasta oo ay AL-Shabaab gebi ahaanba diiddan tahay qabyaaladda, balse waxaa jira taliyayaal ka tirsan oo saldhig qabiil ku leh koonfurta Soomaaliya, hoggaankooduna uu ku tiirsan yahay aqoonsiga sharciyadeed ee deegaankaas iyo weliba booska ay ka joogaan Al-Shabaab. Waxaa marka suurtagal ah in la heli karo in goboladaas ay noqdaan maamullo la aqoonsan yahay, haddii ay suurtagal noqoto in deegaamo kala duwan ay raacaan waddooyin kala duwan oo loo raaco horumarinta dastuurka.

Arintani ma aha mid sahlan, sababtoo ah waxay dalbaneysaa in qaar ka tirsan Al-Shabaab loo aqoonsado in ay ka mid noqdaan nidaam federaal ah oo furfuran. Maaddaama ay aad u yar tahay in dowladda ku meel gaarka ah ay si militari ahaan ah ay uga guuleysato Al-Shabaab wixii ka baxsan Muqdisho, isla markaana ay fog tahay in la helo maamul goboleed haysta aqoonsi sharciyadeed oo ka hor yimaada Al-Shabaab, in markaa fursad loo siiyo qaar ka tirsan Al-Shabaab iyo bulshadoodaba in la soo xera geliyo ayaa waxey siin kartaa fursadda ugu wanaagsan ee nabad looga gaari karo konfurta iyo bartamaha Soomaaliaya.

Sannadaha badan ee uu dagaalka iyo burburku ka taagnaa Soomaaliya iyo guuldarrada ku timid in dib loo hiso dowladda dhexe ayaa waxey xoojineysaa in furfurnaan iyo waddooyin kala duwan loo maro xasiliinta Soomaaliya. Inkastoo maammulada cusub ee soo baxaya qaarkood ay mushkilado keeni karaan, kuwa kale ayaa ah geeddi-socod dhab ah oo ka yimid dadka deegaannada si loo xalliyo walaac iyaga markaa hayey. Somaliland iyo Puntland waxaa ay leeyihii nidaamyo dowladeed oo kala duwan balse mar dhow waa ay isu ekaan doonaan haddii lagu guuleysto dimuquraadiyenta Puntland. Caqabaddu waxey markaa ahaaneysaa sidii guushaas looga fulin lahaa meelaha kale ee Soomaaliya. Khibradda Somaliland iyo Puntland ayaa ah in geeddi-socod ay hoggaaminayaan dadka deegaanka uu ka guuleysi badan yahay mid ay hogaamiso dowladda dhexe amaba shisheeyaha; taa macnaheedu waa in la sugo amaba la dhiirri geliyo in awoodaha kala duwan ee ka jira koonfurta Soomaaliya laga dhigo dowlad goboleedyo.

Balse si ay dariiqadani u shaqeysyo waxaa laga doonayaa in dhaqanka dowladda ku meel gaarka ah iyo beesha caalamkuba is beddelaan. Waajibaadka saarnaa dowladda dhexe ee ahaa in ay caawiso sameynta maamullo federaal ah amaba ay la shaqeysyo kuwa hadda jira kama aysan soo bixin. Wuxaaba xaqiqa ah in mararka qaarkood ay dowladda ku meel gaarka ah ay u dhaqantey si liddi ku ah maamullada hadda jira. Isu imaanshaha ay bishii Sibtember ay isugu yimaadeen hal mowqif dowladda ku meel gaarka ah, Puntland, ASWJ iyo Galmudug si ay u taageeraan geeddi-socodka mudada kala guurka ah ayaa ah isbedel baaxad leh istaahilana in si weyn loo taageero loona dhiirri geliyo. Balse waddada gacan u fidinta ah ayaa waxaa ay ka tagtey kuwo badan oo ah maamullada hadda soo baxaya. Waxaa muhiim ah in la sugo fursadaha ku soo darista in ay furan tahay, gaar ahaan haddii waddadan siyaasadeed ee ah in muddada kala guurka la dhameystirayo ay noqoto mid heshey horusocod dhab ah.

6. Ka qeyb gelinta Somaliland?

Somaliland waxaa ay diiddan tahay ka qeyb galba wada-hadalka nabadda ee Soomaaliya; waxaa ay Soomaaliya u aragtaa arrin khuseysa waddan shisheeye. Balse marka laga eego beesha caalamka waxaa muuqata faa'iido ku jirta in maamulkan sida dimuquraaddiga u haysta oggolaansho sharciyadeed in laga qeyb geliyo sidii xal waara loogu heli lahaa Soomaaliya.

Kala doorashada adag waa in la helo waddo lagu keeni karo khibradda Somaliland iyo faa'iidooyinkeeda oo saameyn wanaagsan u keeni kara

Soomaaliya inteeda kale isla markaasna aan wax u dhimin guusha ay Somaliland lafteeedu gaartey. Waxaa adag in la is tuso in ay Somaliland aqbaleysyo ka qeyb gelistan iyada oo aan la siin tanaasul la taaban karo oo ku aaddan raadinta ay raadineyso madax bannaani iyo gooni isu taag.

Somaliland waxaysan haysan waddo cad oo ay ku gaarto aqoonsi caalami ah, si kasta oo ay u saxan tahay amaba ay u khaldan tahay waxaa hubaal ah in aysan dunidu aqoonsaneyn Somaliland ilaa ay ka aqoonsadaan Midowga Afrika iyo Soomaaliya lafteeedu. Waddo dastuureed oo; ballan qaadaya in aan la baabbi'in xaaladda Somaliland ee hadda; Somaliland-na siinaya xaq in ay kala doorato in ay Soomaaliya ka mid ahaato amaba ay ka go'do ka dib markey in mudo ah ku wada jireen nidaam federaal ah ayaa noqon karta tanaasul wada caawin kara dhinacyada oo dhan.

Dhicintaanka arrin noocan oo kale ah waa mid fog, marka laga eego xasaasiyadda sareysa ee dadka Somaliland ay ka qabi karaan aragti u muujineysa in ay dhaawaceysyo madax banaanidooda. Balse fikirka noocan oo kale ah ayaa waxaa uu xal u keeni karaa su'aasha arrinta Somaliland.

7. Talo soo jeedin gunaanad ah:

Sideebey beesha caalamku ula shaqeeyn kartaa amaba u dhiirri gelin kartaa maamul goboleedyada?

Kulanku waxaa uu hoosta ka xarriiqey arinta udub-dhexaadka u ah kala doorashada dib u dhiska dowladda dalka Soomaaliya: waxa uu yahay dowrka saxa ah ee dowladda dhexe? Qeyaha dowladda ku meel gaarka ah iyo qaar ka mid ah taageerayashooda ayaa qaba in dowladda federaalka ah ay tahay awoodda keliya ee jirta iyo maamulka dhexe oo ka jira dhammaan wadanka oo dhan. Balse Axdigaa ku meel gaarka ah ee la saxiixey sanadkii 2004 iyo xaqiiqada waqaqica dhabta ah ee dalka ka jiraba waxaa ay muujinayaan dowr kale oo ay leedahay dowladda dhexe, taas oo badanaa ku saabsan isu duwid ka dhex dhalata maamullada federaalka ah. Soomaaliya ma noqoneysyo mid ku keli ah dunida haddii ay sameyso nidaam maamul oo awoodda aan laga soo furfuran dowladda dhexe balse awoodda lafteeedaba laga qaato maamullada federaalka ah oo markaas kor u aada dowladda dhexe.

Laguma khasbana in laga tanaasulo tiigsashada in la helo Soomaaliya oo mid ah nabadna ah, balse in la sugo helitaanka midnimo iyo nabad ku saleysan taageero shisheeye waa arrin waalli ah. Maamul goboleedyada ku taagan Soomaaliya oo federal ah kuna dhisan oggolaansho shariiyadeed oo deegaanka ah waxaa ay keenayaan fursad muhiim ah oo horumar

wanaagsan keeni karta. Wuxaaba hubaal ah in dariiqan uu keeni karo dib u soo noqoshada Soomaaliya oo nabad ah xubin muhiim ahna ka ah beesha caalamka.

Soomaalida iyo saaxiibadooda beesha caalamka waxaa ay u baahan yihiin in ay aqoonsadaan fursadaha iyo weliba mushkiladaha ay leeyihiin maamul goboleedyada waana in ay la yimaadaan aragtii bisil oo sidii loola shaqeyn lahaa ah. Maamul kasta oo isku magacaaba maamul goboleed amaba maamul gobol ma la sinna Puntland iyo Somaliland la shaqeyntooduna waa in ay ku xirnaataa taariikh ku dhisan waxqabad. Damaca laga leeyahay in la taageero horumar laga gaaro nabadjelyo deegaan amaba ka guuleysasho degdeg ah oo laga guuleysto Al-Shabaab waa in lagu dheellitiraan waxa ka dhalan kara in la sameeyo cilaqaadyo aan wanaagsaneyn oo markaa hor istaagi kara soo kabashada waqtiga fog ee Soomaaliya.

Farriinta aasaasiga ah ee ka soo baxdey kulankii Chatham House waxey aheyd xukuumadaha ka jira Soomaaliya, ha ahaadeen kuwa qaranka amaba maamul goboleedyada, waa in ay ahaadaan marka ugu horeysa kuwo ay la xisaabtamaan dadka ay sheeganayaan in ay matalaan. Haddii maamullada soo baxaya ay ku guuleystaan in ay dhisaan iskaashi nabadeed ayna billaabaan in ay nabadjelyada u keenaan dadka markaa taageero beesha caalamka ah oo laga fiirsadey oo taxaddar leh ayaa ah mid wax anfaceysa. Balse taageero lagu degdegey oo la siiyo maamulo aan la tijaabin oo ku shaqeynaya nidaam ka baxsan qaab-qarameedka ayaa noqon kara mid dhibaato soo kordhisa. Waxaa suurtagal ah in bulshada rayidka ah ay u bannaan tahay dowr ay ku kala qiimeyn karaan suurtagalmada maamullada hadda soo baxaya.

Aasaasidda maamul goboleedyadu ma aha mid ka soo horjeeda dhisidda dowladda qaranka, balse in labada geeddi-socod la is waafajiyo waxaa ay u baahan tahay in si taxaddar leh loo akhriyo Axdira ku meel gaarka ah. Maamullada hadda soo baxaya oo ku shaqeyn kara qaab dhismeedka guud ee dastuurka waxaa suurtagal ah in ay xoojiyaan dhisidda dowlad federal ah oo awoodaha laga soo qaatey maamul goboleedyo iyo xukuumado dhisan. Taa macnaheedu waa istaraatijiyyada laba-dhanlaha ah (dual-track strategy) waxaa ay u baahan tahay in ay si dhab ah u dhiirri geliso una taageerto dadaallada maamul goboleedyada iyo kuwa dowladda dhexeba in ay waddanka xukumaan, waana in ay aqoonsataa in maamul goboleedyo heley oggolaansho sharchiyeed iyo dowlad dhexe oo la aqbalsan yahay shaqeyneysana in ay labaduba ka mid yihiin xalka.

Iyadoo ay bilaabaneyso dib u eegista dastuurka iyo hirgelinta geeddi-socodka, ayaa waxaa muhiim ah inaan la hilmaamin in Axdira ku meel gaarka ah laftisu uu ku yimid wada hadallo iyo dodo aad u qotodheer oo qaatey muddo laba sanadood ah oo waliba si buuxda loogu caddeeyey mas'uuliyadaha iyo dowrarka ay kala leeyihiiin heerarka kala duwan ee xukuumadaha ay Soomaaliya yeelaneysyo. Waxaa suurta gal ah in loo baahdo hagaajin iyo wax is waafajin, balse waddo kale oo leh gorgortan iyo dodo dhaadheer ayaa waxaa suurta gal ah in aysan wax faa'iido ah soo kordhin. Sidoo kale heshiis dastuuri ah oo aan furfurnayn dadna gees u riixi kara ayaa ah mid dhibaato leh. Xaaladda xasaasiga ah ee siyaasadeed iyo midda nabadjelyaba ayaa dalbaneysa in la helo qaab sal ballaaran, furfuran dadka oo dhanna ka wada qeyb gelinaya aanna meesha ka saareyn maamul kale oo soo bixi kara iyo aragtiyo kale oo lagu gaari karo xasilinta Soomaaliya.

Geeddi-socod shisheeyuhu ay wadaan oo ku billaabanya dhisidda dowlad dhexe oo shaqeysa ma noqon mid lagu guuleysto. Sababta ugu muhiimsan arrintani waa in awoodda iyo aqoonsiga sharciyadeedba ahaataa mid la hantey. Dood aad u xoogganeyd oo kulanka ka soo baxdey ayaa oraneysey in Soomaaliya – sida waddamada kale ee caalamka - sida Mareykanka iyo Switzerland – ay u baahan tahay in awoodda dowlaldda dhexe laga keeno maamul goboleedyada balse aysan noqon sidaa caksigeeda.

Dowladda ku meelgaarka ah waxaa ay ugu tiirsan tahay shisheeyaha aqoonsigeeda sharciyeed iyo jiritaankeeduba. Mala awaalka beesha caalamka ayaa mararka qaarkood ahaa in ay aaminaad badan ay dul saaraan shakhsiyad gaar ah in ay iyagu yihiin fursadda ugu wanaagsan ee lagu xallin karo dhibaatooyinka Soomaaliya. Diirad saariddan ashkhaasta ku dhisan waxaa ay iska indha tireysaa sifada nidaam ee ka taagan dhibaatada Soomaaliya. Waxaa ay u badan tahay in marka la gaaro bisha Ogoosto sanadka 2012 ay Soomaaliya weli heysan doonto dhibaatooyin waaweyn, waxaana ay u badan tahay in dowladda ku meel gaarka ah aysan weli gacanta ku dhigi doonin in ka baxsan magaalada Muqdisho. Saaxiibada shisheeye ee Soomaaliya waa in ay u diyaar garoobaan safar dheer oo kala duwan oo lagu gaaro xasilloonida Soomaaliya.